



Farriintan waxaa la soo geliyay onlaynka iyadoo ku qoran [اللغة العربية](#), [English](#), [Русский](#), [Soomaali](#), [Español](#), [简体中文](#), [繁體中文](#), [日本語](#) iyo [Tiếng Việt](#).

Diseembar 3, 2024

Ku socoto: Xubnaha Bulshada Naafada Garaadka iyo Koriinka (I/DD Bulshada) iyo Wada-hawlgalayaasha Qabiilka

Ka socoto: Dana Hittle, Agaasime Ku-meelgaar ah, Xafiiska Adeegyada Naafada Koriinka (ODDS)

Mawduuca: Adeegyada laga helo Rever Grand si loo sii wado

Ma nabad baa.

Waxaan hayaa akhbaar cusub oo ku saabsan wakaalada bixiyaha Rever Grand. Fadlan akhri farriintan si aad wax badan u ogaato.

Yay tahay cidda uu saameeyay?

Haddii adiga ama qof qoyskaaga ka mid ah aad heshaan adeegyada garaadka iyo korriinka (I/DD) idinka oo u maray Rever Grand, warkani waxaa laga yaabaa inuu idin saameeyo. Fadlan ogow:

- **Waxaad weli xaq u leedahay isla adeegyada adigoo u maraya ODDS.**

- **Waqti xaadirkaan, waxaad dooran kartaa inaad sii wadato helitaanka adeegyada adigoo u marayo Rever Grand.**

Maxaa dhacay?

Saddex bilood ka hor, Waaxda Caafimaadka Oregon (OHA) waxay heshay eedeyn lagu kalsoonaan karo oo ku saabsan musuq-maasuq ka dhan ah Rever Grand. Taasi waa maadaamaa ay Waaxda Caddaaladda ee Oregon ay ku eedaysay in Rever Grand ay lacag ka qaadatay Medicaid taasoo ahayd in aysan helin. Eeg [warkayga laga soo bilaabo Sebteembar 20](#) si aad u hesho faahfaahino dheeraad ah.

OHA waxaa laga yaabaa inay ODDS uga baahato inay joojiso lacag-bixinta Medicaid ee la siiyo Rever Grand, laakiin ma aysan yeelin. Sababtoo ah Rever Grand waxay leedahay shaqaale aad u tiro badan oo ah xirfadlayaal taageero toos bixiya (DSP-yo) kuwaas oo u adeega qiyaastii ilaa 1,850 shakhsi, OHA waxay samaysay sabab wanaagsan oo ka reebitaan si aysan u joojin lacag-bixinnada Medicaid ee la siiyo Rever Grand muddo 90 maalmood ah. Tani waxay ODDS u ogolaatay inay sii wado lacagta ay siiso Rever Grand saddexdii bilood ee la soo dhaafay. 90-kaas maalmood ayaa hadda dhammaansha ku dhow.

OHA waxay dhawaan go'aamisay in sababta wanaagsan ee ka reebitaanka ay sii ahaanayso mid habboon.

Maxaa xiga oo dhici kara?

OHA ayaa qiimeyn ku samayn doonta sababta wanaagsan ee ka reebitaanka marka xaaladdu soo baxdo. Marka laga reebo haddii iyo ilaa

inta OHA ay ka go'aaminayso ka reebitaanka gabi ahaan hadda ma khusayso:

- **ODDS waxay sii wadi kartaa inay lacagaha Medicaid siiso Rever Grand.**
- **Shakhsiyaadka hadda adeegyada ka qaata Rever Grand waxay dooran karaan inay adeegyada iyaga ka sii helaan weli.**

Tani waxay sii ahaanaysaa xaalad sharci oo soo kobcaysa. OHA ayaa wali go'aamisay inay jirto eedaymo la aamini karo oo khiyaamo ah oo ka dhan ah Rever Grand. Waxaan sii wadi doonaa inaan kormeer ku samayno kiisaska sharciga ah ee ku tacaluqo Rever Grand. **Haddii ay wax isbeddelaan oo saamayn ku yeelanayo shakhsiyaadka adeegyada ka hela Rever Grand, ODDS iyo hay'adaha maareynta kiiska ayaa diyaar u ah inay caawiyaan dhammaan kuwa ay saamayntu gaartay.**

Yaa kaaga jawaabi kara su'aalaha?

Haddii aad qabto su'aalo, fadlan la xiriir isku-duwaha adeegyadaada ama wakiilkaaga gaarka ah si uu kuu caawiyo.

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan ODDS, fadlan wac 971-701-5299 ama iimayl u dir odds.casemanagementliaison@odhs.oregon.gov.

Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo inaad kula hadasho ODDS luuqad aan Af-Ingiriis ahayn, oo ay ku jirto luqada dhagoolaha, wac [833-685-0841](tel:833-685-0841) ama iimayl u dir odhs.languageaccess@odhs.oregon.gov.

Qof ayaa dib kuu soo wici doona oo kugula hadli doona luqadda aad doorbidayso si uu kuu caawiyo.

Daacadnimo,



Dana Hittle

Agaasimaha Kumeelgaarka ah

Xafiiska Adeegyada Naafada Korriinka (ODDS)

[Rukumo si aad u hesho wargelinada ODDS.](#)

Farriimihii Hore ee Agaasimaha ODDS waxaa laga heli karaa barta

[https://www.oregon.gov/odhs/agency/Pages/odds.aspx#dm.](https://www.oregon.gov/odhs/agency/Pages/odds.aspx#dm)

Nagala soco barta aannu ku leenahay Facebook @ORHumanServices oo

[sahmi mareegteena.](#)

Waxaad ku heli kartaa bilaash dhukumintigaan isagoo luuqado kale ku qoran, ku qoran far waawayn, qoraalka indhoolayaasha ama qaabka aad jeceshahay ku qoran. Kala xiriir Oregon ODDS lambarka 503-945-5811 ama dd.directoroffice@odhs.oregon.gov. Waxaanu aqbalnaa wicitaanada dhammaan noocyada adeegga gudbinta ee loogu talagalay dadka Dhegaha La', Maqalka Ku Adag Yahay, Dhegaha iyo Indhaha La', dadka aragga la' ama araggoodu hooseeyo. Si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyeyaasha adeegga gudbinta

booqo <https://www.oregonrelay.com> ama

<https://www.fcc.gov/general/internet-based-trs-providers>.

No updates are needed.